Plague Somali



# Cudurka Daacuunka (Plague)

## Waa maxay cudurka daacuunka?

Daacuunka waa cudur keena nooc bakteeriya ah. Sida caadiga ah, cudurka waxa ku faafa jiirka wuxuuna ku daarta dadka ayada oo qaniinta boodada jiirka dushiisa ku nool. Xilligii qarnigii afar iyo tobnaad, cudurkan ku faafay asaga oo ku soo gudbay dunida saddex mowjadood oo waa-weyn, wuxuu dilay saddex-meel ilaa bar dadka ku nool meesha cudurka ka dilaacay.



*Boodo qabto cudurka daacuunka*

Waxa mahad leh horumarinta nadaafada iyo xaaladaha nolosha, faafida daacuunka hadda waa naadir. Hase yeeshee, ilaa 2,000 xaalado ayaa dunida oo dhan sanad kasta la soo wargeliya, waxaana ku jiraan 15 xaaladood ee koonfur-galbeed Maraykanka (U.S.).

Waxa jiraan saddex noocyo oo cudurka daacuunka ah:

- **Cudurka daacuunka ee Qanjar bararka loo yaqaano Bubonic** waxa weye cudurka ugu caansan ee laga qaado dabeecada, waxa latiriyey boqolkiiba 75-97 xaaladood. Calaamooyinka, dhaqsaha lagu garto waxa ku jiraan qandho, dhaxan, tabar –dari, iyo xanuun badan, qanjar barar. Ama "waxa la xiriira qanjarada ee loo yaqaano buboes."
- **Cudurka daacuunka septicemic –** dhiiga oo jiran waxa sabab u ah bakteeriyada daacuunka – wax badan caan ma aha. Waxa la xisaabay in ka yar boqolkiiba 20 in ay yihiin xaalado daacuun ee "caadi ah".
- **Cudurka daacuunka ee neefsiga** waxa weye xanuunka ugu daran ee dhaliya cudurka – laakiin aad buu ugu yar yahay dabeecada. Waxa la xisaabay in ka yar boqolkiiba 14 xaalado. Hase yeeshee, tani waxa laga rumaysan yahay in ay noqoto nooc daacuun oo aad loo malaynayo in ay dhaliyaan weerarada argagaxisada. Waxaana dhacda marka bakteeriyada ay gaarto sambabada, taa soo si dhaqso leh u dhaliso xanuun daran oo la xiriira neefsiga.

In lagu bilaabo daawada kaniiniga ah ee disha jeermiska 24 saacadood gudahooda mooyaane, ruuxa buka si dhaqo ah ayuu u arga-gaxaya wuuna dhimanaya. Dadka buka ee aan qaadan dawo si dhaqso ah, heerka dhimashada ugu dhowaan waxay noqota boqolkiiba 100.

Calaamooyinka cudurka daacuunka neefsiga sida caadiga ah wuxu soo muuqanaya hal ama laba maalmood gudahooda ka dib marka bakteeriyada la qaado.

## Sidee baan u qaadaya cudurka daacuunka?

Dadka waxa ku dhaca cudurka daacuunka ***bubonic*** oo laga qaado xoolo qaba cudurka. Bakteeriyada waxay ku faafta qaniinyo ka timaada boodo qabta cudurka, qaniinyo ama xoqid ka timaada xoolo cudurka qaba, ama xiriir toos ah oo lala yeesho hilibka xoolo qaba cudurka.

Dadka waxa ku dhaca cudurka daacuunka ***neefsiga ayaga (pneumonic)*** oo ku neefsada dhibco yar-yar ee ka kooban bakteeriyada daacuunka. Dhibcaha yar-yar waxa lagu sii daayey hawada marka dadka qaba cudurka – ama xoolaha ay qufacaan. Hase yeeshee, haddii cudurka daacuunka loo isticmaalo hub ahaan, bakteeriyada waxa lagu sii deyn kara hawada ayada oo ujeeddo laga leeyahay.

MINNESOTA MDH DEPARTMENT OF HEALTH
Communications Office
625 North Robert Street
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
(651) 201-4989
www.health.state.mn.us

# Cudurka Daacuunka (Plague) – Pog 2

## Cudurka dad kale ma qaadi karta?

Haa – ayada oo lagu neefsado dhibcaha yar-yar ee hawada ku daayeen marka dadka qaba cudurka ay qunfacaan.

## Maxaa loogu tixgeliyey in cudurka uu surragal u noqdo haub arga-gax?

Suuragalka isticmaalka cudurka daacuunka waxa la darsaayey ugu yaraan 60 sanadood. Jabaaneeska waxa la soo sheegay in ay isku dayeen bombooyin yar-yar si ay faafiyaan boodada cudurka qabta xilligii Dagaalkii Labaad ee Dunida. Maraykanka iyo Midowgii hore ee Sufiyeetiga labadaba waxay horumariyeen hababka bakteeriyada cudurka daacuunka loogu sii deynayo hawada xilliyadii 1950 iyo 1960.

Cudurka daacuunka waxa loo tixgeliyey in suuragal yahay hubka lagula dagaalmo naflayda sababta oo ah:

- Bakteeriyada waxa lagu sii deyn kara hawada, waxaana suuragal ah in tiro badan oo dad ah uu ku dhaco cudurka.
- Bakteeriyada lagu sii daayey hawada waxay dhalin doonta dhibaato halis ah ee neefsiga oo keena cudurka daacuunka.
- Cudurka daacuunka neefsiga qof ayaa u gudbin kara qofka kale, faafin dheeraad oo cudurka ah.
- Cudurka daacuunka neefsiga waa cudur halis ah oo keena dhimasho heer sare ah
- Faafinta cudurka daacuunka neefsiga waxa keena cabsi aad u badan iyo arga-gax.

Caalamadii ugu horaysay ee weerarka cudurka daacuunka neefsiga waxay noqotay dad badan oo codsanaya iska daweynta dhibaatooyinka xanuunka daran ee qeybta neefsashada, hal ilaa laba maalmood weerarka ka dib. Waqtigaas, bakteeriyada kuma harayso hawada. Dhaqso la'aan, dawo xoog badan, dad badan oo qaaday bakteeriyada way dhiman doonaan.

## Ma laga hortagi kara cudurka daacuunka?

Ma jiro tallaal waqtiga loo helay cudurka daacuunka, inkasto dadaal loogu jiro in la soo saaro mid. Marka dadka ay ka qaadaan dad ama xoolo qaba cudurka, dawada kiniiniga disha jeermiska cudurka ayaa loo isticmaala ka hortaga cudurka.

Bakteeriyada cudurka daacuunka lagu sii daayey hawada waxay noolaan doonta hal saac ka yar. Ayaga waxay ku baaba'ayaan iftiinka qoraxda, kulaylka iyo qalaylkaba. Waxa kale oo aad awood u leedahay in hoos u dhigtid khatarta cudurka haddii aad iska saartid dharkaaga aadna qubaysatid, isla saacad gudahooda ka dib marka cudurka la qaaday. Hase yeeshee, weli waxa aad u baahana tahay in aad u qaadatid kiniiniga dila jeermiska cudurka ka hortaga ahaan.

## Ma la daweyn kara cudurka?

Dhamaan noocyada cudurka daacuunka waxa lagu daweyn kara kiniiniga dila jeermiska cudurka. Hase yeeshee, dadka qaba cudurka daacuunka neefsiga waa in la daweeya 24 saacadood gudahooda ka dib marka ka soo baxaan calaamooyinka cudurka. Haddii ayaga aan ahayn cudurka daacuunka neefsiga waqti kasta wuxu noqon kara mid dilaa ah.

## Maxaan sameeya haddii aan u maleeyo in aan qaaday cudurka daacuunka?

Haddii aad qaaday cudurka daacuunka, ma fahmaysid in aad qabtid. Hase yeeshee, haddii aad haysid sabab kasta oo lagu rumeeyo in aad cudurka qaaday, si dhaqso leh ula hadal dhakhtarkaaga. Haddii aad araktid xaalado kasta oo ku shaki geliya ama dhaq-dhaqaaqa xaafaddaada – oo ay ku jiraan suuragalka jeermiska cudurka in loo isticmaalo hub ahaan – foojignaan geli hay'adda fulinta sharciga xaafaddaada.